



Warbixin ku saabsan covid-19 oo ku socota adigii dhawaan yimid Iswiidhan

Iska baar cudurka haddaad xanuun dareemeyso

Haddaad leedahay astaamaha cudurka covid-19, sida qandho, qufac, cuno-xanuun ama diif, waa muhiim inaad raacdo talooyinka Hay'adda Ilaallinta Caafimaadka Dadweynaha. Taasi waa mid ku khuseysa xitaa hadday astaamuhu yihiin kuwo fudud.

Haddaad leedahay astaamaha covid-19 oo ay hal maalin kaaga bixi waayaan, waa muhiim inaad cudurka iska baarto. Nidaamka iyo xilliga baaritaanka way kala duwan yihiin oo waxay ku xiran yihiin hadba meesha aad deggan tahay.

Gal 1177.se/covid-19-prov si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.

Haddaad qabto su'aalo guud oo ku saabsan covid-19,
wac 08-123 680 00 ama 113 13.

Haddaad u baahn tahay talo caafimaad,
wac 1177.

Bogga krisinformation.se waxaad kala socon kartaa warar ku qoran af-soomaali oo ku saabsan covid-19 oo ka soo baxaya hay'adaha dawladda.



Swedish Civil
Contingencies
Agency

We promote the opportunities of migration by running a project co-financed by the Asylum, Migration and Integration Fund.